

JAMHUURIYADDA		SOMALILAND	
FAAFINTA RASMIGA AH			
SOMALILAND REPUBLIC OFFICIAL GAZETTE		الْجُمْهُورِيَّةُ الرَّسْمِيَّةُ لْجُمْهُورِيَّةِ صَوْمَالِيْلَانْد	
XAFIISKA GARYAQAANKA GUUD EE QARANKA JSL, HARGEYSA E-mail: Garyaqaankaguud@gmail.com			
Sanadka: 5aad	Cadadka: 6aad ee june	Taariikh: 01/07/2016	
QIIMAHA CADADKA: SL. Sh. RUKUNKA (Subscription):			
QIIMAHA FAAFINTA AAN DAWLIGA AHAYN ee Qaybta Shanaad: Sadarkii Boggii kastaaba SL. Sh.			

TUSMADA CADADKA

<u>QAYBTA KOWAAD: XEERARKA</u> BAARLAMAANKA IYO XEER NIDAAMIYAYAASHA: 1) Sooma bixin	
<u>QAYBTA LABAAD: XEER</u> NIDAAMIYAYAASHA IYO DIKREETOYINKA MADAXWEYNAHA:	
2) <u>XEER MADAXWEYNE</u> : 0634/062016 Bixin Derajo	387
3) <u>XEER MADAXWEYNE</u> : 0635/062016 Bixin Derajo	379
4) <u>XEER MADAXWEYNE</u> : 0636/062016 Bixin Derajo	380
5) <u>XEER MADAXWEYNE</u> : 0637/062016 Bixin Derajo	381
6) <u>XEER MADAXWEYNE</u> : 0639/062016	382

- Bixin Derajo
7) **XEER MADAXWEYNE** : 0640/062016 **383**
Bixin Derajo
8) **XEER MADAXWEYNE** : 0641/062016 **384**
Bixin Derajo



QAYBTA SADEXAAD:

DIGREETOYINKA,

WAREEGTOOYINKA, AMARADA &

XEER NIDAAMIYAYAASHA

WASIIRADA, IWM

- 9)Fulin Go'aano kasoo baxay Gudiga **386**
Cadaaladda AA. Garsoorka

QAYBTA AFRAAD: AMARADA &

GO'AANADA MAAMUL

- 10) Diiwaan Gelin Shirikada Ocean
Construction & Contracting Company **389**
Xafiiska Xeer illaalinta Guud
Diiwaan Gelin Shirikada Total
Construction & Contractor Company **390**
Xafiiska Xeer illaalinta Guud
Diiwaan Gelin Shirkada Hadaf Construction
Company **392**
Xafiiska Xeer illaalinta Guud
11) Diiwaan Gelin Shirkada Som Professional
Engeneering **393**
Xafiiska Xeer illaalinta Guud
12) Diiwaan Gelin Shirikada Arabian Oil LLC **395**
Xafiiska Xeer illaalinta Guud
13) Diiwaan Gelin Shirikada OGf Mators
Company **396**
Xafiiska Xeer illaalinta Guud

- | | | |
|---|---|-----|
| 14) Diiwaan Gelin Shirikada Orbit Construction Contracting Company.
<u>Xafiiska Xeer illaalinta Guud</u> |  | 397 |
| 15) Diiwaan Gelin Shirikada Gemstone Trading Company
<u>Xafiiska Xeer illaalinta Guud</u> | | 399 |
| 16) Diiwaan Gelin Shirikada African Trade Connection Horn of Africa Limited.
<u>Xafiiska Xeer illaalinta Guud</u> | | 400 |
| 17) Diiwaan Gelin Shirikada Holland Dairy Foods
<u>Xafiiska Xeer illaalinta Guud</u> | | 402 |
| 18) Diiwaan Gelin Shirikada Qaabsan Architecture and Construction Company
<u>Xafiiska Xeer illaalinta Guud</u> | | 403 |
| 19) Diiwaan Gelin Shirikada Core Africa
<u>Xafiiska Xeer illaalinta Guud</u> | | 405 |

QAYBTA SHANAAD : OGEYSIISYADA

Sooma bixin

QAYBTA KOWAAD:
XEERARKA BAARLAMAANKA IYO XEER
NIDAAMIYAYAASHA:



QAYBTA LABAAD:
XEER NIDAAMIYAYAASHA IYO
DIKREETOYINKA MADAXWEYNAHA:

REPUBLIC OF  **SOMALILAND**

THE PRESIDENT

JSL/M/XERM/249-4042/062016

DATE....26/06/016

XEER MADAXWEYNE Lr: 0634/062016

BIXIN DERAJO

Madaxweynaha Jamhuuriyadda Somaliland

Markuu Arkay:

Qodobka 90aad, Faqradiisa 4aad
ee Dastuurka Jamhuuriyadda
Somaliland;

Markuu Arkay:

Qoraalka Taliyaha Ciidanka
Qaranka ee sumadiisu tahay
KT/CQ/09-/2016, kuna
taariikhaysan 18/05/2016,
ujeeddadiisuna tahay codsi
dalacsiin saraakiil min hal darajo;

Markuu Garwaaqsaday:

Xilka naf-huridda iyo heeganka
joogtaysan ee ay qaranka u
hayaan;

Markuu Ku-qancay:

In bixinta Derajadu ay kor u
qaadi doonto milgaha, sharafta
iyo haybadda Dawladnimo;

Wuxuu go'aansaday

In 134 Sarkaal oo ka tirsan Saraakiisha Ciidanka Qaranka Jamhuuriyadda Somaaliland ee tafaasiishooda iyo astaamahoodu ku cad yihiin qoraalka xeerkan ku lifaaqan, la dallacsiinayo min hal darajo.

Allaa Mahad Leh,

Axmed Maxamed Silanyo

Madaxweynaha Jamhuuriyadda Somaliland

REPUBLIC OF



SOMALILAND

THE PRESIDENT

JSL/M/XERM/249-4043/062016

DATE....26/06/016

XEER MADAXWEYNE Lr: 0635/062016

BIXIN DERAJO


Madaxweynaha Jamhuuriyadda Somaliland

Markuu Arkay:

Qodobka 90aad, Faqradiisa 4aad
ee Dastuurka Jamhuuriyadda
Somaliland;

Markuu Arkay:

Qoraalka Guddida Dib-u-sixidda Derajooyinka iyo Nidaamka Xaqsiinta Ciidammada ee ujeeddadiisu tahay dalacsiin saraakil ka tirsan Ciidanka Booliiska;



Markuu Garwaaqsaday:

Xilka naf-huridda iyo heeganka joogtaysan ee ay qaranka u hayaan;

Markuu Ku-qancay:

In bixinta derajadu ay kor u qaadi doonto milgaha, sharafta iyo haybadda Dawladnimo;

Wuxuu go'aansaday

In 45- Sarkaal oo ka tirsan Saraakiisha Ciidanka Booliska Jamhuuriyadda Somaaliland ee tafaasiishooda iyo astaamahoodu ku cad yihiin qoraalka xeerkan ku lifaaqan, la siiyo derajooyinka ay mudan yihiin.

Allaa Mahad Leh,

Axmed Maxamed Silanyo

Madaxweynaha Jamhuuriyadda Somaliland

REPUBLIC OF  SOMALILAND

THE PRESIDENT

JSL/M/XERM/249-4044/062016

DATE....26/06/016

XEER MADAXWEYNE Lr: 0636/062016

BIXIN DERAJO

Madaxweynaha Jamhuuriyadda Somaliland

Markuu Arkay: Qodobka 90aad, Faqradiisa 4aad ee Dastuurka Jamhuuriyadda Somaliland;

Markuu Arkay: Qoraalka Guddida Dib-u-sixidda Derajooyinka iyo Nidaamka Xaqsiinta Ciidammada ee ujeeddadiisu tahay dalacsiin saraakiil ka tirsan ciidanka Xeebaha;

Markuu Garwaaqsaday: Xilka naf-huridda iyo heeganka joogtaysan ee ay qaranka u hayaan;

Markuu Ku-qancay: In bixinta derajadu ay kor u qaadi doonto milgaha, sharafta iyo haybadda Dawladnimo;

Wuxuu go'aansaday

In 82-Sarkaal oo ka tirsan Saraakiisha Ciidanka Ilaalada Xeebaha Jamhuuriyadda Somaaliland ee tafaasiishooda iyo astaamahoodu ku cad yihiin qoraalka xeerkan ku lifaaqan, la siiyo derajooyinka ay mudan yihiin.

Allaa Mahad Leh,

Axmed Maxamed Silanyo
Madaxweynaha Jamhuuriyadda Somaliland

REPUBLIC OF  SOMALILAND

THE PRESIDENT

JSL/M/XERM/249-4045/062016

DATE....26/06/016

XEER MADAXWEYNE Lr: 0637/062016

BIXIN DERAJO

Madaxweynaha Jamhuuriyadda Somaliland



- Markuu Arkay: Qodobka 90aad, Faqradiisa 4aad ee Dastuurka Jamhuuriyadda Somaliland;
- Markuu Arkay: Qoraalka Guddida Dib-u-sixidda Derajooyinka iyo Nidaamka Xaqsiinta Ciidammada ee ujeeddadiisu tahay dalacsiin saraakiil ka tirsan ciidanka Asluubta;
- Markuu Garwaaqsaday: Xilka naf-huridda iyo heeganka joogtaysan ee ay qaranka u hayaan;
- Markuu Ku-qancay: In bixinta derajadu ay kor u qaadi doonto milgaha, sharafta iyo haybadda Dawladnimo;

Wuxuu go'aansaday

In 22-Sarkaal oo ka tirsan Saraakiisha Ciidanka Asluubta Jamhuuriyadda Somaaliland ee tafaasiishooda iyo astaamahoodu ku cad yihiin qoraalka xeerkan ku lifaaqan, la siiyo derajooyinka ay mudan yihiin.


Allaa Mahad Leh,

Axmed Maxamed Silanyo
Madaxweynaha Jamhuuriyadda Somaliland

REPUBLIC OF  SOMALILAND

THE PRESIDENT

JSL/M/XERM/249-4047/062016

DATE: 26/06/016 

XEER MADAXWEYNE Lr: 0639/062016

BIXIN DERAJO

Madaxweynaha Jamhuuriyadda Somaliland

Markuu Arkay: Qodobka 90aad, Faqradiisa 4aad ee Dastuurka Jamhuuriyadda Somaliland;

Markuu Arkay: Qoraalka Guddida Dib-u-sixidda Derajooyinka iyo Nidaamka Xaqsiinta Ciidammada ee ujeeddadiisu tahay dalacsiin saraakiil ka tirsan Ciidanka Laanta Socdaalka;

Markuu Garwaaqsaday: Xilka naf-huridda iyo heeganka joogtaysan ee ay qaranka u hayaan;

Markuu Ku-qancay: In bixinta derajadu ay kor u qaadi doonto milgaha, sharafta iyo haybadda Dawladnimo;

Wuxuu go'aansaday

In 125-Sarkaal oo ka tirsan Saraakiisha Ciidanka laanta Socdaalka Jamhuuriyadda Somaaliland ee tafaasiishooda iyo astaamahoodu ku cad yihiin qoraalka xeerkan ku lifaaqan, la siiyo derajooyinka ay mudan yihiin.

Allaa Mahad Leh,

Axmed Maxamed Silanyo
Madaxweynaha Jamhuuriyadda Somaliland



REPUBLIC OF SOMALILAND



THE PRESIDENT

JSL/M/XERM/249-4048/062016

DATE....26/06/016

XEER MADAXWEYNE Lr: 0640/062016

BIXIN DERAJO

Madaxweynaha Jamhuuriyadda Somaliland

Markuu Arkay: Qodobka 90aad, Faqradiisa 4aad ee Dastuurka Jamhuuriyadda Somaliland;


Markuu Arkay: Qoraalka Taliyaha Ciidanka Booliska ee ku taariikhaysan 25/06/2016 iyo 25/05/2016 ujeeddadiisuna tahay codsi dalacsiin saraakiil min hal darajo;

Markuu Garwaaqsaday: Xilka naf-huridda iyo heeganka joogtaysan ee ay qaranka u hayaan;

Markuu Ku-qancay: In bixinta derajadu ay kor u qaadi doonto milgaha, sharafta iyo haybadda Dawladnimo;

Wuxuu go'aansaday

In 98-Sarkaal oo ka tirsan Saraakiisha Ciidanka Booliska Jamhuuriyadda Somaaliland ee tafaasiishooda iyo astaamahoodu ku cad yihiin qoraalka xeerkan ku lifaaqan, la dalacsiyo min hal derajo.



Allaa Mahad Leh,

Axmed Maxamed Silanyo
Madaxweynaha Jamhuuriyadda Somaliland

REPUBLIC OF  **SOMALILAND**

THE PRESIDENT

JSL/M/XERM/249-4049/062016

DATE....26/06/016

XEER MADAXWEYNE Lr: 0641/062016

BIXIN DERAJO

Madaxweynaha Jamhuuriyadda Somaliland

Markuu Arkay: Qodobka 90aad, Faqradiisa 4aad ee Dastuurka Jamhuuriyadda Somaliland;

Markuu Arkay: Qoraalka Taliyaha Ciidanka Asluubta ee sumadiisu tahay TCA/G11/322/2016 kuna taariikhaysan 27/05/2016 ujeeddadiisuna tahay codsi dalacsiin saraakiil min hal derajo;

Markuu Garwaaqsaday: Xilka naf-huridda iyo heeganka joogtaysan ee ay qaranka u hayaan;

Markuu Ku-qancay: In bixinta derajadu ay kor u qaadi doonto milgaha, sharafta iyo haybadda Dawladnimo;

Wuxuu go'aansaday



In 29-Sarkaal oo ka tirsan Saraakiisha Ciidanka Asluubta Jamhuuriyadda Somaaliland ee tafaasiishooda iyo astaamahoodu ku cad yihiin qoraalka xeerkan ku lifaaqan, la dalacsiyo min hal derajo.

Allaa Mahad Leh,

Axmed Maxamed Silanyo
Madaxweynaha Jamhuuriyadda Somaliland

QAYBTA SADEXAAD:
DIKREETOYINKA, WAREEGTOOYINKA,
AMARADA & XEER NIDAAMIYAYAASHA
WASIIRADA, IWM:

JAMHUURIYADA SOMALILAND
WASAARADDA CADDAAALADDA
AA.GARSOORKA



REPUBLIC OF SOMALILAND
MINISTRY OF JUSTICE
JUDICIAL AFFAIRS

Minister Office

REF:WC&AG/XW/G-2/263/16

Date:05/06/2016

Ku:- Radio Hargeysa

=Hargeysa=

Ku: Telefishanka Qaranka SLNTV,

=Hargeysa=

Og:-Gudoomiyayaasha Maxkamadahaha Racfaanka,

=Fadhigooda=



Og: Gudoomiyaha Maxkamada Sare ee JSL

=Hargeysa=

Og: Garyaqaanka Guud ee Dawladda,

= Hargeysa=

**UJ:FULIN GO'AANO KASOO BAXAY GUDIGA
CADAALADDA.**

Wasaaradda Caddaalada ee JSL, iyada oo cuskanaysa Qodbka 106aad ee Dastuurka Qaranka Faqradiisa **1aad**, kaasoo qeexaya inay Wasaaradda Caddaaaladu u xil saarantahay Fulinta Go'aanada Guddiga Cadaaladda .

Sidaa darteed, waxaanu halkan ku faafinaynaa Go,aanka Lambarkiisu yahay **MS/GGC/G-3/02/2016 ee 04/06/2016.**


GUDIGA CADAALADU WAXAY GO, AAMIYEEN

QODOBKA. 1^{aad}.

MAGACAABID GARSOORAYAAL

1. **Maxamed C/llahi Haybe**, waxa loo Magacaabay Garsoore Maxkamadda Degmada Hargeysa.

2. **Maxamed Cumar Dhimbiil**, waxa loo magacaabay Garsoore Maxkamadda Gob/Degmo Gabiley.
3. **Sh. Yaasiin Aadan Maxamed**, waxa loo magacaabay Garsoore Maxkamadda Degmada Saba-wanaag.
4. **Sharmaarke Axmed Maxamed**, waxa loo magacaabay Garsoore Maxkamadda Degmada Burco.
5. **Axmed Maxamed Jibriil**, waxa loo magacaabay Garsoore Maxkamadda Gobolka Sanaag.



Qodobka 2^{aad}

BEDEL IYO DIGNIIN GARSOORAYAAL

1. **Mustafe Cabdi Cali**, waxa lagabedelay Garsoore Maxkamada Racfaanka G/Maroodi-Jeex, waxaana loo bedelay Maxkamadda Gobolka Awdal, waxaana la siiyay Digniin anshax marineed.
2. **Maxamed Ducaale Aadan**, waxa laga bedelay Maxkamadda Gobolka Sanaag, waxaa loo magacaabay Garsoore Maxkamadda Racfaanka Gobolka Sanaag.
3. **Maxamed Jaamac Ibrahim**, oo ah ku xigeenka Xeer Ilaaliyaha Guud ee Gobolka Maroodi jeex, waxaana la siiyey Digniin anshaxmarineed.

QODOBKA 3^{aad}

OGOLAANSHO CODSI ISCASILAAD

1. **Aadan Axmed Muuse**, oo ah ku xigeenka Xeer Ilaaliyaha Guud ee Qaranka una soo gudbiyey Guddiga Cadaaladda iscasilaad, waa laga ogolaaday.

2. **Axmed Maxamed Xasan**, oo ahaa Garsoore Maxkamadda Gobolka Sanaag una soo gudbiyaya Guddiga Cadaaladda iscasilaad, waa laga ogolaaday.



QODOBKA 4AAD

SHAQO KA SAARID KU SAABSAN ANSHAX-MARIIN

1. **Siciid Maxamaed Kaahin**, oo ahaa Garsoore Maxkamadda Gobol/Degmo Gabiley, waxa laga saaray shaqadii uu kahayay Garsoorka

ALLAA MAHAD LEH.

Axmed Faarax Cadare.

WASIIRKA CADDALADA & ARR.GARSOOR

QAYBTA AFRAAD:
AMARADA & GO'AANADA MAAMUL



JAMHUURIYADDA  SOMALILAND

XAFIISKA XEER ILAALINTA GUUD

XIG/JSL/128/2016.

05/06/2016

Hargeysa.

Ku: Cidda Ay Khuseyso.

Ujeeddo:- Diiwan Gelin Shirkadeed.

Xafiiska Xeer Ilaalinta Guud ee Qaranka jamhuuriyada Somaliland oo u xil saaran Diiwan Gelinta Shirkadaha.
(Sole Proprietorship)

Markuu arkay: - Qodobadda 11aad ee Xeer Shirkadaha, kaas oo Awood u siinaya Xafiiska Xeer Ilaalinta Guud in ay Diiwan geliso Shirkadaha .

Markuu arkay: - Xeerka Shirkadda Magaceedu yahay, OCEAN CONSTRUCTION & CONTRACTING COMPANY.

Markuu Arkay: - In ay Saamiga Shirkaddu waafaqsan yahay Xeerka Shirkadaha Xeer N0.25/2004 Company Act of Somaliland.

Markuu arkay: - Saxeexa saamilaha Shirkaddu uu saxeexay sida uu qabo qodobka

11aad Xubintiisa 3aad ee Xeer
Shirkadaha.



Wuxuu Diiwan Geliyey.y

Inay Xafiiskan si sharci ah uga diiwan gashan tahay Shirkada magaceedu yahay, **OCEAN CONSTRUCTION & CONTRACTING COMPANY, Astaanteeduna tahay:-** (Dhisme magaca shirkadu ku hoos qoran yahay), shaqadeeduna tahay Dhismaha (Construction), xarunteeduna tahay Magaaladda Hargeysa, laga bilaabo maanta oo ay taariikhdu tahay 05/06/2016.

Allaa Mahad Leh.

(Xasan Axmed Aadan)

Xeer Ilaaliyaha Guud ee Qaranka JSL

JAMHUURIYADDA  SOMALILAND

XAFIISKA XEER ILAALINTA GUUD

XIG/JSL/129/2016.

05/06/2016


Hargeysa

Ku: Cidda Ay Khuseyso.

Ujeeddo:- Diiwan Gelin Shirkadeed.

Xafiiska Xeer Ilaalinta Guud ee Qaranka Jamhuuriyadda Somaliland oo u xil saaran Diiwan Gelinta Shirkadaha.
(Sole Proprietorship)

Markuu arkay: - Qodobadda 11aad ee Xeer Shirkadaha, kaas oo Awood u siinaya Xafiiska Xeer Ilaalinta Guud in ay Diiwan geliso Shirkadaha



Markuu arkay: - Xeerka Shirkadda Magaceedu yahay, **TOTAL CONSTRUCTION & CONTRACTOR COMPANY.**

Markuu Arkay: - In ay Saamiga Shirkaddu waafaqsan yahay Xeerka Shirkadaha Xeer NO.25/2004 Company Act of Somaliland.

Markuu arkay:- Saxeexa saamilaha shirkaddu uu saxeexay sida uu qabo qodobka 11aad Xubintiisa 3aad ee Xeer Shirkadaha.

Wuxuu Diiwaan Geliyey.y

Inay Xafiiskan si Sharci ah uga diiwan gashan tahay Shirkada magaceedu yahay **TOTAL CONSTRUCTION & CONTRACTOR COMPANY. Astaanteeduna tahay:-** (Dhisme saddex xagal ah uu ka muuqdo dhisme hal daaqaad leh magaca shirkadu ku hoos qoran yahay), shaqadeeduna tahay Dhismaha **(Construction)**, xarunteeduna tahay Magaaladda Hargeysa, laga bilaabo maanta oo ay taariikhdu tahay 05/06/2016.

Allaa Mahad Leh

(Xasan Axmed Aadan)

Xeer Ilaaliyaha Guud ee Qaranka JSL

JAMHUURIYADDA  SOMALILAND

XAFIISKA XEER ILAALINTA GUUD

XIG/JSL/130/2016.

05/06/2016

Hargeysa.

Ku: Cidda Ay Khuseyso.

Ujeedo:- Diiwan Gelin Shirkadeed

Xafiiska Xeer Ilaalinta Guud ee Qaranka Jamhuuriyadda Somaliland oo u xil saaran Diiwan Gelinta Shirkadaha.
(Sole Proprietorship)

Markuu arkay:- Qodobadda 11aad ee Xeer Shirkadaha, kaas oo Awood u siinaya Xafiiska Xeer Ilaalinta Guud in ay Diiwan geliso Shirkadaha.

Markuu arkay: - Xeerka Shirkadda Magaceedu yahay, HADAF CONSTRUCTION COMPANY.


Markuu Arkay: - In ay Saamiga Shirkaddu waafaqsan yahay Xeerka Shirkadaha Xeer NO.25/2004 Company Act of Somaliland.

Markuu arkay: - Saxeexa saamilaha Shirkaddu uu saxeexay sida uu qabo qodobka 11aad Xubintiisa 3aad ee Xeer Shirkadaha.

Wuxuu Diiwan Geliyey.y

Inay Xafiiskan si Sharci ah uga diiwan gashan tahay Shirkada magaceedu yahay, **HADAF CONSTRUCTION**

COMPANY, Astaanteeduna tahay:- (Goobo ay ku dhex jirto xidig magaca shirkadu ku hoos qoranyahay), shaqadeeduna tahay Dhismaha (Constraction), xarunteeduna tahay Magaaladda Boorama, laga bilaabo maanta oo ay taariikhdu tahay 05/06/2016



Allaa Mahad Leh.

(Xasan Axmed Aadan)

Xeer Ilaaliyaha Guud ee Qaranka JSL.

JAMHUURIYADDA  SOMALILAND

XAFIISKA XEER ILAALINTA GUUD

XIG/JSL/131/2016.

05/06/2016

Hargeysa.

Ku: Cidda Ay Khuseyso.


Ujeedo:- Diiwan Gelin Shirkadeed

Xafiiska Xeer Ilaalinta Guud ee Qaranka Jamhuuriyadda Somaliland oo u xil saaran Diiwan Gelinta Shirkadaha.

Markuu arkay: - Qodobadda 11aad ee Xeer Shirkadaha, kaas oo Awood u siinaya Xafiiska Xeer Ilaalinta Guud in ay Diiwan geliso Shirkadaha.

Markuu arkay: - Xeerka Shirkadda Magaceedu yahay, SOM PROFESSIONAL ENGINEERING, oo ay ku cad yihiin xubnaha shirkaddu, sida ku cad qodobka 11aad (2) (a) Somaaliland Company law.

Markuu Arkay:- In ay Saamiga Shirkaddu waafaqsan yihiin Xeerka Shirkadaha Xeer NO.25/2004 Company Act of Somaliland, saamiyadooduna ay sugan yihiin.



Markuu arkay:- Saxeexa saamilayda Shirkaddu ay saxeexeen sida uu qabo qodobka 11aad Xubintiisa 3aad ee Xeer Shirkadaha.

Wuxuu Diiwan Geliyey.y

Inay Xafiiskan si Sharci ah uga diiwan gashan tahay Shirkada magaceedu yahay, **SOM PROFESSIONAL ENGINEERING, Astaanteeduna tahay:-** (Magaca Shirkada), shaqadeeduna tahay soo dejinta iyo dhoofinta allaabooyinka (Import and Export), xarunteeduna tahay Magaaladda Hargeysa, laga bilaabo maanta oo ay taariikhdu tahay 05/06/2016

Allaa Mahad Leh.

(Xasan Axmed Aadan)

Xeer Ilaaliyaha Guud ee Qaranka JSL

JAMHUURIYADDA  SOMALILAND

XAFIISKA XEER ILAALINTA GUUD

XIG/JSL/132/2016.

08/06/2016

Hargeysa.

Ku: Cidda Ay Khuseyso.

Ujeeddo:- Diiwan Gelin Shirkadeed.

Xafiiska Xeer Ilaalinta Guud ee Qaranka Jamhuuriyadda Somaliland oo u xil saaran Diiwan Gelinta Shirkadaha.

Markuu arkay:- Qodobadda 11aad ee Xeer Shirkadaha, kaas oo Awood u siinaya Xafiiska Xeer Ilaalinta Guud in ay Diiwan geliso Shirkadaha.

Markuu arkay: - Xeerka Shirkadda Magaceedu yahay, ARABIAN OIL LLC

Markuu Arkay: - In ay Saamiga Shirkaddu waafaqsan yahay Xeerka Shirkadaha Xeer NO.25/2004 Company Act of Somaliland.

Markuu arkay:- Saxeexa saamilaha Shirkaddu uu saxeexay sida uu qabo qodobka 11aad Xubintiisa 3aad ee Xeer Shirkadaha.

Wuxuu Diiwan Geliyey.y

Inay Xafiiskan si sharci ah uga diiwan gashan tahay Shirkada magaceedu yahay **ARABIAN OIL LLC**, **Astaanteeduna tahay:-** (olol), shaqadeeduna tahay Soo dejinta shidaalka (fuel importation) xarunteeduna tahay

Magaaladda Hargeysa, laga bilaabo maanta oo ay taariikhdu tahay 08/06/2016

Allaa Mahad Leh.

(Xasan Axmed Aadan)



Xeer Ilaaliyaha Guud ee Qaranka JSL.

JAMHUURIYADDA  SOMALILAND

XAFIISKA XEER ILAALINTA GUUD

XIG/JSL/133/2016.

08/06/2016

Hargeysa.

Ku: Cidda Ay Khuseyso.

Ujeedo:- Diiwan Gelin Shirkadeed

Xafiiska Xeer Ilaalinta Guud ee Qaranka Jamhuuriyadda Somaliland oo u xil saaran Diiwan Gelinta Shirkadaha.


(Sole proprietorship)

Markuu arkay: - Qodobadda 11aad ee Xeer Shirkadaha, kaas oo Awood u siinaya Xafiiska Xeer Ilaalinta Guud in ay Diiwan geliso Shirkadaha.

Markuu arkay: - Xeerka Shirkadda Magaceedu yahay, OGF MATORS COMPANY.

Markuu Arkay:- In ay Saamiga Shirkaddu waafaqsan yahay Xeerka Shirkadaha Xeer NO.25/2004 Company Act of Somaliland.

Markuu arkay: - Saxeexa saamilaha Shirkaddu uu saxeexay sida uu qabo qodobka 11aad Xubintiisa 3aad ee Xeer Shirkadaha.



Wuxuu Diiwan Geliyey.y

Inay Xafiiskan si Sharci ah uga diiwan gashan tahay Shirkada magaceedu yahay, **OGF MATORS COMPANY, Astaanteeduna tahay:-** (magaca Shirkada oo ay ku dul yaalaan laba caleemood), shaqadeeduna tahay Soo dejinta baabuurta (Impor), xarunteeduna tahay Magaaladda Hargeysa, laga bilaabo maanta oo ay taariikhdu tahay 08/06/2016.

Allaa Mahad Leh.

(Xasan Axmed Aadan)

Xeer Ilaaliyaha Guud ee Qaranka JSL

JAMHUURIYADDA  **SOMALILAND**
XAFIISKA XEER ILAALINTA GUUD

XIG/JSL/134/2016.

12/06/2016

Hargeysa.

Ku: Cidda Ay Khuseyso.

Ujeeddo:- Diiwan Gelin Shirkadeed.

Xafiiska Xeer Ilaalinta Guud ee Qaranka Jamhuuriyadda Somaliland oo u xil saaran Diiwan Gelinta Shirkadaha.

Markuu arkay:- Qodobadda 11aad ee Xeer Shirkadaha, kaas oo Awood u siinaya Xafiiska Xeer Ilaalinta Guud in ay Diiwan geliso Shirkadaha

Markuu arkay: - Xeerka Shirkadda Magaceedu yahay, ORBIT CONSTRUCTION CONTRACTING COMPANY, oo ay ku cadyihiin xubnaha shirkadu, sida ku cad qodobka 11(2) (a) Somaliland Company Law.

Markuu Arkay: - In ay Saamiga Shirkaddu waafaqsan yihiin Xeerka Shirkadaha Xeer NO.25/2004 Company Act of Somaliland, saamiyadooduna ay suganyihiin.

Markuu arkay: - Saxeexa saamilayda Shirkaddu ay saxeexeen sida uu qabo qodobka 11aad Xubintiisa 3aad ee Xeer Shirkadaha.

Wuxuu Diiwan Geliyey.y

Inay Xafiiskan si Sharci ah uga diiwan gashan tahay Shirkada magaceedu yahay, **ORBIT CONSTRUCTION CONTRACTING COMPANY, Astaanteeduna tahay:-** (Goobo ay ku dhex jiraan Dhismayaal), shaqadeeduna tahay Dhismaha (Construction), xarunteeduna tahay Magaaladda Boorama, laga bilaabo maanta oo ay taariikhdu tahay 12/06/2016

Allaa Mahad Leh.

(Xasan Axmed Aadan)

Xeer Ilaaliyaha Guud ee Qaranka JSL.

JAMHUURIYADDA SOMALILAND



XAFIISKA XEER ILAALINTA GUUD

XIG/JSL/135/2016.

14/06/2016

Hargeysa.

Ku: Cidda Ay Khuseyso.

Ujeedo:- Diiwan Gelin Shirkadeed

Xafiiska Xeer Ilaalinta Guud ee Qaranka Jamhuuriyadda Somaliland oo u xil saaran Diiwan Gelinta Shirkadaha.

Markuu arkay:- Qodobadda 11aad ee Xeer Shirkadaha, kaas oo Awood u siinaya Xafiiska Xeer Ilaalinta Guud in ay Diiwan geliso Shirkadaha.

Markuu arkay: - Xeerka Shirkadda Magaceedu yahay, GEMSTONE TRADING COMPANY, oo ay ku cad yihiin xubnaha Shirkaddu, sida ku cadqodobka 11aad (2) (a) Somaliland Company law.

Markuu Arkay: - In ay Saamiga Shirkaddu waafaqsan yihiin Xeerka Shirkadaha Xeer N0.25/2004 Company Act of Somaliland, Saamiyadooduna ay sugan yihiin.

Markuu arkay:- Saxeexa saamilayda Shirkaddu ay saxeexeen sida uu qabo qodobka

11aad Xubintiisa 3aad ee Xeer
Shirkadaha.

Wuxuu Diiwan Geliyey.y



Inay Xafiiskan si sharci ah uga diiwan gashan tahay Shirkada magaceedu yahay, **GEMSTONE TRADING COMPANY, Astaanteeduna tahay:-** (Xarfaha GST oo ay dhinac taallo xabad diamond ah), shaqadeeduna tahay dhoofinta macdanta (Exporting Gemstone), xarunteeduna tahay Magaaladda Hargeysa, laga bilaabo maanta oo ay taariikhdu tahay 14/06/2016

Allaa Mahad Leh.

(Xasan Axmed Aadan)

Xeer Ilaaliyaha Guud ee Qaranka JSL

JAMHUURIYADDA  **SOMALILAND**

XAFIISKA XEER ILAALINTA GUUD

XIG/JSL/136/2016.

16/06/2016

Hargeysa.


Ku: Cidda Ay Khuseyso.

Ujeedo:- Diiwan Gelin Shirkadeed

Xafiiska Xeer Ilaalinta Guud ee Qaranka Jamhuuriyadda Somaliland oo u xil saaran Diiwan Gelinta Shirkadaha.
(Sole Proprietorship)

Markuu arkay:- Qodobadda 11aad ee Xeer Shirkadaha, kaas oo Awood u siinaya

Xafiiska Xeer Ilaalinta Guud in ay Diiwan geliso Shirkadaha.



Markuu arkay: - Xeerka Shirkadda Magaceedu yahay, AFRICAN TRADE CONECTION HORN OF AFRICA LIMITED.

Markuu Arkay:- In ay Saamiga Shirkaddu waafaqsan yahay Xeerka Shirkadaha Xeer NO.25/2004 Company Act of Somaliland.

Markuu arkay:- Saxeexa saamilaha Shirkaddu uu saxeexay sida uu qabo qodobka 11aad Xubintiisa 3aad ee Xeer Shirkadaha.

Wuxuu Diiwan Geliyey.y

Inay Xafiiskan si Sharci ah uga diiwan gashan tahay Shirkada magaceedu yahay, **AFRICAN TRADE CONECTION HORN OF AFRICA LIMITED, Astaanteeduna tahay:-** (Magaca Shirkada), shaqadeeduna tahay ganacsi Guud (General Trading), xarunteeduna tahay Magaaladda Hargeysa, laga bilaabo maanta oo ay taariikhdu tahay 16/06/2016.

Allaa Mahad Leh.

(Xasan Axmed Aadan)

Xeer Ilaaliyaha Guud ee Qaranka JSL

JAMHUURIYADDA  SOMALILAND

XAFIISKA XEER ILAALINTA GUUD 

XIG/JSL/137/2016.

16/06/2016

Hargeysa.

Ku: Cidda Ay Khuseyso.

Ujeeddo:- Diiwan Gelin Shirkadeed.

Xafiiska Xeer Ilaalinta Guud ee Qaranka Jamhuuriyadda Somaliland oo u xil saaran Diiwan Gelinta Shirkadaha.

(Sole Proprietorship)

Markuu arkay: - Qodobadda 11aad ee Xeer Shirkadaha, kaas oo Awood u siinaya Xafiiska Xeer Ilaalinta Guud in ay Diiwan geliso Shirkadaha.

Markuu arkay: - Xeerka Shirkadda Magaceedu yahay, HOLLAND DAIRY FOODS.

Markuu Arkay: - In ay Saamiga Shirkaddu waafaqsan yahay Xeerka Shirkadaha Xeer NO.25/2004 Company Act of Somaliland.

Markuu arkay: - Saxeexa saamilaha Shirkaddu uu saxeexay sida uu qabo qodobka 11aad Xubintiisa 3aad ee Xeer Shirkadaha.

Wuxuu Diiwan Geliyey.y

Inay Xafiiskan si Sharci ah uga diiwan gashan tahay Shirkada magaceedu yahay, **HOLLAND DAIRY FOODS, Astaanteeduna tahay:-** (Magaca Shirkada), shaqadeeduna tahay Soo dejinta Allaabooyinka (Import), xarunteeduna tahay Magaaladda Hargeysa, laga bilaabo maanta oo ay taariikhdu tahay 16/06/2016.



Allaa Mahad Leh.

(Xasan Axmed Aadan)

Xeer Ilaaliyaha Guud ee Qaranka JSL

JAMHUURIYADDA  SOMALILAND

XAFIISKA XEER ILAALINTA GUUD

XIG/JSL/138/2016.

18/06/2016

Hargeysa.

Ku: Cidda Ay Khuseyso.

Ujeedo:- Diiwan Gelin Shirkadeed

Xafiiska Xeer Ilaalinta Guud ee Qaranka Jamhuuriyadda Somaliland oo u xil saaran Diiwan Gelinta Shirkadaha.

Markuu arkay:- Qodobadda 11aad ee xeer Shirkadaha, kaas oo Awood u siinaya Xafiiska Xeer Ilaalinta Guud in ay Diiwan geliso Shirkadaha.

Markuu arkay: - Xeerka Shirkadda Magaceedu yahay, QAABSAN ARCHITECTURE AND CONSTRUCTION COMPANY, oo ay ku cad yihiin xubnaha Shirkaddu, sida

ku cad qodobka 11aad (2) (a)
Somaliland Company law

Markuu Arkay:-

In ay Saamiga Shirkaddu waafaqsan yihiin xeerka Shirkadaha Xeer No.25/2004 Company Act of Somaliland, saamiyadooduna ay sugan yihiin.

Markuu arkay:-

Saxeexa saamilayda Shirkaddu ay saxeexeen sida uu qabo qodobka 11aad Xubintiisa 3aad ee Xeer Shirkadaha.

Wuxuu Diiwan Geliyey.y

Inay Xafiiskan si Sharci ah uga diiwaan gashan tahay Shirkada magaceedu yahay, **QAABSAN ARCHITECTURE AND CONSTRUCTION COMPANY, Astaanteeduna tahay** (Magaca Shirkada), shaqadeeduna tahay Dhismaha (Construction), xarunteeduna tahay Magaaladda Hargeysa, laga bilaabo maanta oo ay taariikhdu tahay 18/06/2016

(Xasan Axmed Aadan)

Xeer Ilaaliyaha Guud ee Qaranka JSL

JAMHUURIYADDA  SOMALILAND

XAFIISKA XEER ILAALINTA GUUD

XIG/JSL/139/2016.

19/06/2016

Hargeysa.

Ku: Cidda Ay Khuseyso.

Ujeedo:- Diiwan Gelin Shirkadeed.

Xafiiska Xeer Ilaalinta Guud ee Qaranka Jamhuuriyadda Somaliland oo u xil saaran Diiwan Gelinta shirkadaha

Markuu arkay:- Qodobadda 11aad ee xeer shirkadaha, kaas oo Awood u siinaya Xafiiska Xeer Ilaalinta Guud in ay diiwan geliso Shirkadaha.

Markuu arkay: - Xeerka Shirkadda Magaceedu yahay CORE AFRICA, oo ay ku cad yihiin xubnaha Shirkaddu, sida ku cad qodobka 11aad (2) (a) Somaliland Company law.

Markuu Arkay:- In ay saamiga Shirkaddu waafaqsan yihiin xeerka Shirkadaha xeer No.25/2004 Company Act of Somaliland, saamiyadooduna ay sugan yihiin.

Markuu arkay:- Saxeexa saamilayda Shirkaddu ay saxeexeen sida uu qabo qodobka

11aad Xubintiisa 3aad ee Xeer
Shirkadaha.



Wuxuu Diiwan Geliyey.y

Inay Xafiiskan si Sharci ah uga diiwan gashan tahay Shirkada magaceedu yahay, **CORE AFRICA, Astaanteeduna tahay:-** (Magaca Shirkada) shaqadeeduna tahay soo Dejinta iyo Dhoofinta Allaabooyinka (Import and Export), xarunteeduna tahay Magaaladda Hargeysa, laga bilaabo maanta oo ay taariikhdu tahay 19/06/2016.

Allaa Mahad Leh.

(Xasan Axmed Aadan)

Xeer Ilaaliyaha Guud ee Qaranka JSL